Faallo Qoto-dheer: SDP.F20.04

SOMALI DIALOGUE PLATFORM

12 Sebteembar 2022

# Xulashooyinka heshiis laga gaaro habka federaaleynta maaliyadda

Kulan Consulting

# Hordhac

Soomaaliya ayaa markii ugu horreysay si rasmi ah u qaadatay hannaanka federaalka sannadkii 2004-tii markii la sameeyay Axdiga Federaalka Kumeelgaarka. Tan iyo markaas, dhidibada ayaa loo aasay iyadoo la qeexay markii la meel mariyay Dastuurka Federaalka Kumeelgaarka ah ee 2012 iyo dhismihii xigay ee Dowlad-goboleedyada ee dalka. Habkani waxa uu saldhig u noqday iskaashiga iyo wada-noolaanshaha, inkastoo uu xaddidnaa, ka dhexeeya madaxda iyo hay'adaha Soomaalida.

Sikastaba ha ahaatee, qeybo muhiim ah oo kamid ah qaabka federaalka Soomaaliya ayaa ah mid aan la qeexin, oo ay ku jiraan heshiis ku saabsan qaabka federaaleynta maaliyadeed – si kale haddii loo dhigo, heerkee dowladeed ayaa awood u leh in uu dakhli uruuriyo sidoo kalena kharash-gareeyo. Tani waa tiir muhiim u ah qaab-dhismeedka federaalka, maadaama uu ugu dambeyntii qeexayo heerka madax-bannaanida dowlad-goboleedyada marka loo eego Dowladda Federaalka Soomaaliya. Tani waxay ka dhigeysaa arrin aad u khilaaf badan, iyadoo dowlad-goboleedyadu doonayaan inay xoojiyaan madax-bannaanidooda halka dowladda federaalka ay rabto inay xaqiijiso gacan ku heyn xooggan. Nidaamka maaliyaddu ma ahan oo keliya maareynta xiriirka ka dhexeeya hay'adaha dowladda federaalka iyo dowlad-goboleedyada, waxa uuna saameyn ballaaran ku leeyahay horumarka dhaqaalaha Soomaaliya. Siyaasadda maaliyadeed waxay saameyn weyn ku yeelan kartaa kobaca dhaqaalaha, ganacsiga gudaha iyo tartanka, iyo tayada adeeg bixinta. Intaa waxaa dheer, waa muhiim in la maareeyo sinnaan la'aanta gobollada Soomaaliya.

Horumar muhiim ah ayaa laga gaaray in la caddeeyo qaabka maaliyadda Soomaaliya. Heshiisyada siyaasadeed ee lagu maamulayo dakhliga laga helo shatiyada kalluunka iyo kalluumeysiga tuunaha ayaa la gaaray, inkastoo qeyb ahaan la fuliyay. Qaab-dhismeedka loogu talagalay wadaaga dakhliga kasoo xarooda batroolka iyo wax-soo-saarka kale ayaa looga heshiiyey sanadkii 2018 magaalada Baydhabo, laakiin weli taageero buuxda ma heysto heshiiskaas inkastoo laga dhigay sharci la saxiixay sanadkii 2019. Xeerarka Maamulka Maaliyadda iyo Dakhliga Dadweynaha ee 2019 wuxuu iftiimiyay arrimo muhiim ah, laakiin sharcinimadooda weli si buuxda uma ahan dhaqangal.

Sikastaba ha ahaatee, dhowr dhaliilo ayaa weli ku jira heshiiska maaliyadda, iyadoo ay jirto xaaladda hadda oo ah in ay dowlad-goboleedyadu qaadaan, maamulaan, sidoo kalena kharash gareeyaan dhammaan dakhliga ay uruuriyaan iyadoo dowladda federaalka ay masuul ka tahay dakhliga Muqdisho. Si kale haddii loo dhigo, ma jiro dakhli wadaag shaqeynaya oo ka baxsan heshiisyada kumeelgaarka ah oo ku saabsan ganacsiga caalamiga ah iyo deeqaha. Tani waxay abuurtay sinnaan la'aan, maadaama ilaa hadda saldhigga ugu weyn ee canshuuraha Soomaaliya uu ka yimaado canshuuraha ganacsiga caalamiga ah (kaasoo 33 boqolkiiba ka ah dakhliga soo xarooda). Canshuuraha ganacsiga oo inta badan laga qaado dekadaha Muqdisho, Kismaayo iyo Boosaaso, si siman looguma qeybiyo dhulka Soomaaliya. Taasi waxay ka dhigan tahay in Puntland iyo Jubaland ay yeesheen dakhli madax-bannaan oo lagu maalgeliyo howlaha asaasiga ah ee maamuladaas iyo adeegyada amniga oo si madax-bannaan u shaqeeya. Dowladda federaalka sidoo kale waxay ka faa'iideysaneysaa dakhliga kasoo xarooda dekedda Muqdisho, iyadoo u isticmaasha in ay ku daboosho kharashaadka dowladda ee dhanka maamulka iyo amniga. Dowlad-goboleedyada dekado la'aanta ah, sikastaba ha ahaatee, waxay ku tiirsan yihiin lacago ay dowladda dhexe u dirto oo aan joogta ahayn, taasoo la micno ah in maamulladooda ay la kulmaan caqabado waaweyn oo la xiriira xoojinta hay'adahooda. Intaa waxaa dheer, ma jirto siyaasad guud oo ku saleysan qeybsiga deeqaha dibadda kuwaasoo ah 27 boqolkiiba wadarta dakhliga lasoo xareeyo. Intaa waxaa dheer, dowladaha hoose guud ahaan ma awoodaan in ay sameystaan hab lagu maamuli karo maaliyadda.

Xaaladdani ayaa caqabad weyn ku ah jihada siyaasadda Soomaaliya. Tartan u dhexeeya heerarka kala duwan ee dowladda oo ku saabsan ilaha dakhli waxay keeni karaan khilaaf iyo xasillooni-darro siyaasadeed. Marka la eego nidaamka sinnaan la'aanta ee hadda jira, tani waxay dhalin kartaa cabashooyin dheeraad ah oo u dhexeeya kooxo kala duwan, oo wiiqaya ujeedooyinka horumarineed ee muhiimka ah. Dowladaha hoose, oo loo arko inay yihiin tiir muhiim u ah nidaamka nabad-dhisidda iyo dimuqraadiyadda, ma awoodi doonaan inay ciyaaraan kaalintaan haddii aysan jirin waddo u oggolaanaysa heerkaan maamul in uu noqdo mid dhaqaale ahaan waari kara.

Caddeynta nidaamka heshiiska federaaleynta maaliyadda sidaas darteed maahan oo keliya muhiim ee waxa uu u baahan doontaa wada-hadal siyaasadeed oo ballaaran. Faalladan waxay doonaysaa inay taageerto dadaallada siyaasadeed ee xallin kara is-afgarad la'aantan iyadoo la qeexayo lana falanqeynayo xulashooyinka nidaamyo maaliyadeed oo qeyb ka ah nidaamka federaalka Soomaaliya. Waxaa loogu talagalay in xog lagusoo bandhigo iyo in la dhiirigeliyo wada-hadallada siyaasadeed ee u dhexeeya siyaasiyiinta Soomaaliyeed iyo dad weynaha, waxaana wehliya faallooyin kale oo soo bandhigaya xulashooyin ku saabsan arrimaha kale ee lagu muransan yahay ee heshiiska siyaasadda dalka, oo ay ku jiraan qeybinta awoodaha, maqaamka Muqdisho iyo naqshadda amniga. Faalladan waxaa la qoray iyadoo lala tashanayo khubaro farsamo iyo siyaasiyiin qeyb ka ahaa hindisaha 'F20' ee Somali Dialogue Platform, kulamadaasoo si iskaashi ku dhisan u sahmiyay xal-u-helidda arrimaha la isku hayo ee heshiiska siyaasadda Soomaaliya.

# Qaab-dhismeedka falanqeynta

Faalladan waxay tilmaameysaa saddex meelood oo ballaaran oo geeddi-socod kasta oo siyaasadeed oo macno leh uu u baahan doono in uu wax ka qabto si xal loogu helo habab maaliyadeed oo qeyb ka ah nidaamka federaalka ee Soomaaliya

1. **Qaabeynta dakhli uruurinta**: Waxay ku lug leedahay go'aaminta heerka dowladeed ee mas'uul ka ah:

   a. uruurinta iyo lahaanshaha dakhliga laga helo 'saldhig canshuureed' gaar ah, sida ganacsiga caalamiga ah, canshuuraha ganacsiga iyo canshuurta dakhliga;

   b. go'aaminta qiimaha canshuurta ee saldhig kasta oo canshuureed;

   c. uruurinta iyo maamulidda canshuurta saldhig kasta oo canshuureed.

2. **Waajibaadka kharash bixinta**: Waxay ku lug leedahay go'aaminta heerka xukuumadeed ee masuulka ka ah kharashka ku baxa meel cayiman – badanaa heerka loo qoondeeyay awoodda bixinta alaabta ama adeegyada laga hadlayo.

3. **Wareejinta maaliyadda**: Waxay ku lug leedahay go'aaminta haddii iyo sida dakhligu looga qoondeeyo heerarka dowladda, xaaladdan sida caadiga ah waxay dowladda federaalka usoo wareejineysaa dowlad-goboleedyada. Wareejinta maaliyadeed waxay fulisaa saddex ujeedo oo isla xiriirta:

   a. **Maareynta sinnaan la'aanta u dhexeysa dowlad-goboleedyada marka la eego dakhliga soo xarooda**, kaasoo inta badan ku lug leh wadaagga dakhliga u dhexeeya dowladda federaalka iyo dowlad-goboleedyada iyadoo la isticmaalayo halbeeg hufan oo laga yaabo in laga wada xaajoodo, kaasoo ku salaysan qolo kasta dhaqaalaheeda, ama lagu saleeyo arrimo kale;

b. **Buuxinta 'farqiga maaliyadeed' marka dowlad-goboleedyadu aysan haysan ilo ku filan oo lagu fuliyo shaqooyinka uu dastuurku u igmaday inay qabtaan**, iyadoo inta badan la wareejinayo maaliyadda iyadoo lagu saleynayo farqiga u dhexeeya miisaaniyadda dowlad-goboleedyada ee lagu heshiiyey iyo ilaha kale ay heli karaan;

c. **Taageeridda ka mira dhalinta arrimaha mudnaanta u leh dowladda federaalka** xitaa haddii dhaqaalaha ay maamulayaan dowlad-goboleedyadu, oo sida caadiga ah ku lug leh 'u qoondeynta' dhaqaale ama adeegyada gaarka ah ee waafaqsan siyaasadda dowladda federaalka iyo xeer-hoosaadka, si loo xaddido doorka maamullada ka hooseeya dowladda dhexe ee go'aaminta isticmaalka maaliyadda.

Hannaan siyaasadeed oo guuleysta wuxuu u badan yahay inuu horseedo is-la-oggol laga gaaro saddexdaas qeybood ee muhiimka ah. Iyadoo taa la taageerayo, faalladan waxay qeexeysaa oo ay falanqeyneysaa saddax xulasho siyaasadeed oo ballaaran oo loogu talagalay hababka maaliyadda ee nidaamka federaalka Soomaaliya:

1. **Mid dhexe**: Dakhli uruurinta iyo kharash bixinta inta badan waxaa gacanta ku haynaya dowladda federaalka.

2. **Mid baahsan:** Dakhli uruurinta iyo kharash bixinta inta badan waxaa maamulaya dowlad-goboleedka, marka laga reebo meelaha muhiimka ah qaarkood.

3. **Mid daadejisin**: dowladda federaalka waxay door weyn ka ciyaareysaa dakhli uruurinta, laakiin dowlad-goboleedyadu waxay leeyihiin madax-bannaani weyn ee xagga kharash bixinta iyo baahinta adeegyada dowladda.

Xulasho kastaa si gaar ah ayaa loo falanqeynayaa iyadoo la qeexayo faa'iidooyinka iyo cilladaha ay midkasta leedahay, iyadoo talooyin lagasoo jeedinayo xulasho kasta meelaha lagu muransan yahay ee ku saabsan doorka dowladda federaalka, dowlad-goboleedka iyo dowladaha hoose qaadan karaan. Xiriirka uu la leeyahay qeybaha kale ee nidaamka federaalka ayaa la muujinayaa, si gaar ahaan naqshadda amniga iyo qoondeynta awoodaha (eeg faallooyinka Platform-ka ee arrimahan khuseeysa).

# Xulashooyin

## Xulashada 1-aad: Mid dhexe

Habkani waxa uu awoodaha dakhli-uruurinta iyo kharash bixinta ku koobayaa gacanta dowladda federaalka, iyadoo la sameynayo nidaam wareejin maaliyadeed oo ay dowladda federaalka siin doonto dowlad-goboleedyada deeqo ku xiran shuruud waxayna dejin doontaa siyaasadda sida lacagahan loo isticmaali doono. Dowlad-goboleedyadu waxay canshuuro ka uruurin doonaan meelo gaar ah oo aad u kooban, sidoo kale dowladda federaalka ayaa go'aamin doonta inta badan kharashaadkooda. Doorka dowladaha hoose ayaa ahaan doona mid aad u yar. Noocan ayay u badan tahay in uu la jaanqaadi karto naqshad amni ku kooban gacanta dowladda dhexe iyo qeybinta awoodaha oo ay dowladda federaalka leedahay masuuliyado ka badan inta ay hadda heysato.

| Awoodaha maaliyadeed | Dowladda federaalka | Dowlad-goboleedyada | Dowladaha hoose |
|---|---|---|---|
| Qaabeynta dakhli uruurinta | Dowladda federaalka ayaa go'aamineysa dhammaan waajibaadka dakhli uruurinta, oo ay ku jiraan qeexidda saldhigga canshuurta, dejinta qiimaha canshuurta iyo uruurinta canshuuraha<br><br>Dowladda dhexe aya uruurineyso islamarkaana maamuleyso inta badan canshuuraha, oo ay ku jiraan canshuuraha ganacsiga iyo dakhliga | Dowlad-goboleedyadu waxay uruurinayaan dhowr canshuur oo 'toos ah' oo ah kuwo aad u kooban sida canshuurta guryaha ama canshuurta tafaariiqda.[1] Saldhigga iyo qiimayaasha waxaa go'aaminaya siyaasadda canshuurta federaalka | Mid aad u yar |
| Waajibaadka kharash bixinta | Dowladda federaalka waxay leedahay saami badan oo kharash bixin ah oo ku baxa qeybaha, oo ay ku jiraan meelaha muhiimka ah sida amniga qaranka, kaabayaasha iyo adeegyada bulshada<br><br>Dowladda ayaa dejineysa siyaasad ku saabsan kharashka ku bixi kara heer kasta oo dowladeed, waxayna sameyneysaa korjoogteyn iyo kormeer | Dowlad-goboleedyadu waxay dowladda federaal-ka ka helayaan qoondooyin miisaaniyadda ah oo lagu saleynayo siyaasadda kharash bixinta oo ay dejisay dowladda federaalka<br><br>Dowlad-goboleedyada waxaa saaran masuuli-yadda in ay warbixin u gudbiyaan dowladda federaalka | Mid aad u yar |
| Wareejinta maaliyadda iyo dakhli wadaagga | Dowladda federaalka waxay qaabeyneysaa wareejinta la qoondeeyay, ujeedada iyo qeybta loogu talagalay kuwaasoo waafaqaya siyaasa-daha federaalka, iyadoo dowladda federaalka sameyneyso korjoogteynta kharash bixinta.<br><br>Dowladda federaalka ayaa dejineysa siyaasado lagu maamulayo laguna qeybinayo dakhliga kasoo xarooda kheyraadka dalka | Dowlad-goboleedyadu waxa ay helayaan wareejin maaliyadeed oo loogu talagalay in lagu kharash gareeyo arrimo gaar ah si waafaqsan qoond-eynta miisaaniyadda ay go'aamisay dowladda federaalka | Waxaa suurta gal ah in dowlad-goboleedyada lacago u wareejiyaan dowladaha hoose |

### Faa'iidooyinka suurtagalka ah:

- Dakhliga oo ay dowladda dhexe qaaddo waxa uu keeni karaa hufnaan badan oo canshuureed sidoo kalana waxa uu keenayaaa fursad ah in dakhliga dib loogu qeybiyo dowlad-goboladyada, si wax looga qabto sinnaan la'aanta guud ahaan ee dowlad-goboleedyada.
- Waxay ka hortageysaa in dowlad-goboleedyada ay u qeexaan saldhigga canshuuraha siiyaabo iskasoo horjeeda, dejinta qiimayaasha kala duwan ee canshuuraha, iyo carqaladeynta dhaqdhaqaaqa ganacsiga guud ahaan ee dowlad-goboleedyada.
- Madax-bannaani iyo xakameyn weyn waxay u oggolaanaysaa dowladda fed-eraalka inay ka hortagto dhoofinta canshuuraha, taasoo dhalan karta marka dowlad-goboleedyadu canshuuraan dadka deggan dowlad-goboleed kale.
- Waxay u oggolaaneysaa dowladda federaalka in ay hoggaamiso ajende bala laaran oo mideysan oo ku aaddan dowlad-dhisidda.

### Dhaliilaha suurtagalka ah:

- Waxay abuuri kartaa in si weyn dowlad-goboleedyadu maaliyad haan ku tiir-sanaadaan dowladda federaalka, taasoo keeni karta in rabitaanka muwaad-diniinta maxalliga ah la iska indho-tiro taasoo abuuri karta tabaashooyin dowlad-goboleedyada dhexdooda ah.
- In gacanta dowladda federaalka lagusoo koobo dakhliga iyo awoodaha khar-ash bixinta waxa ay kordhin kartaa loollanka loogu jiro qabashada xafiisyada

1 Canshuuraha 'tooska' ah waa canshuur ay si toos ah hay'ad u siiso hay'ad dowladeed; canshuuraha ku 'kooban deegaanka' waxaa ku jira saldhigyo canshuureed oo inta badan juqraafi ahaan go'an, sida canshuurta guryaha.

dowladda federaalka, taasoo maadaama aanay kalsooni jirin, keeni karta khilaaf.

- Marka loo eego sida shaqooyinka loo qoondeeynayo, dowladda federaalka waxay u badan tahay in ay yeelan doonto awood canshuureed oo badan iyo masuuliyadaha kharash bixinta oo yar, halka dowlad-goboleedyaduna ay lahaan doonaan awood canshuureed yar iyo kharash bixin badan. Tani waxay keeni kartaa farqi maaliyadeed oo heer dowlad-goboleed ah, oo ay wehliso maamullada maxalliga ah oo aan lahayn awood ay ku daboolaan farqigaas iyo baahida kharash bixinta.

- Fursado xaddidan ee isla xisaabtan ee heerarka dowladda, maadaama awooddu ay ku uruursan tahay dowladda dhexe.

## Xulashada 2-aad: Mid baahsan

Xulashadan, dowlad-goboleedyadu inta badan waa u madax bannaan yihiin uruurinta dakhliga iyo bixinta kharashka. Saddexda xulasho marka la eego, mid-kan wuxuu u dhow yahay xaaladda hadda taagan, iyadoo dowlad-goboleedy-adu ay inta badan masuul ka yihiin canshuuraha iyo kharashaadka goobaha ay ka arrimiyaan. Doorka dowladaha hoose ee hababka maaliyadeed waxay u badan tahay inay si weyn u kala duwanaan doonto, iyadoo ku xiran siyaas-adaha dowlad-goboleed kasta. Qaabka noocan oo kale ah wuxuu u badan yahay inuu barbar socdo naqshad amni oo ay masuuliyad weyn qaadanayaan dowlad-goboleedyada, gaar ahaan xagga booliska iyo xitaa taliska iyo maam-ulka ciidanka. Waxa kale oo ay u badan tahay in ay barbar socon doonto in loo qoondeeyo awoodaha ugu badan dowlad-goboleedyada iyo dowladaha hoose.

| Awoodaha maaliyadeed | Dowladda federaalka | Dowlad-goboleedyada | Dowladaha hoose |
|---|---|---|---|
| Qaabeynta dakhli uruurinta | Dowladda federaalka waxa ay dejin kartaa oo ke-liya siyaasadda canshuuraha, sidoo kalan waxay canshuur ka uruururin kartaa meelaha loo arko in ay hoos yimaaddaan awoodda federaalka iyo/ama ku xaddidan xarunta dowladda federaalka<br><br>Dowladda federaalka ayaa dejineysa siyaasadda canshuuraha meelaha qaarkood si ay u dejiso waajibaad dakhli uruurin isku mid ah, si ay u jooji-so tartanka u dhexeeya dowlad-goboleedyada | Dowlad-goboleedyadu waxay si madaxbanaan u qeexanayaan saldhigyada canshuuraha, waxayna dejinayaan qiimayaasha, waxay soo rogayaan canshuuro, sidoo kalana waxay maamulayaan dakhliga dhulka ay maamulaan<br><br>Dowlad-goboleedyadu waxay uruurinayaan oo ay maamulayaan inta badan canshuuraha, oo ay ku jiraan canshuuraha ganacsiga | Way kula duwan yihiin dowlad-goboleedyada |
| Waajibaadka kharash bixinta | Dowladda federaalka waxay leedahay door aad u xaddidan, iyadoo masuuliyadda kharash bixin badan loo xilsaarayo dowlad-goboleedyada.<br><br>Dowladda federaalka waxa ay kharash badan ku bixineysaa siyaasadaha heer qaran, sida maareynta dhaqaalaha guud, nidaaminta suuqa, siyaasadda arrimaha dibadda, socdaalka iyo amniga qaranka | Dowlad-goboleedyadu waxay kharash ku bixinayaan oo ay maamulayaan inta badan badee-cooyinka iyo adeegyada<br><br>Dowlad-goboleedyadu waxay dejinayaan miisaaniyadahooda iyaga u gaarka ah oo ku saley-san baahida dowlad-goboleedka iyo mudnaanta siyaasadda, oo ay ku maalgeliyaan dakhliga u gaarka ah | Way kula duwan yihiin dowlad-goboleedyada |
| Wareejinta maaliyadda iyo dakhli wadaagga | Wareejinta maaliyadeed kooban oo u dhexeeysa dowladda federaalka iyo dowlad-goobleedyada, inkastoo laga yaabo in ay ka duwanaato haddii dakhliyo badan uu kasoo xaroodo kheyraadka dabiiciga ah, iyadoo la raacayo habab gaar ah oo loo maro wadaagista dakhligaas | Wareejinta maaliyadeed kooban oo u dhexeeysa dowlad-gpboleedyada iyo dowladda federaalka, marka laga reebo meelo gaar ah oo lagu heshiiyey | Way kula duwan yihiin dowlad-goboleedyada |

### Faa'iidooyinka suurtagalka ah:

- Qodobka 50-aad ee dastuurka Soomaaliya waxa uu dhigayaa in 'Awoodda la siiyo heerka xukuumadeed oo ay u badan tahay in si fiican loogu fulinayo'. Waxaa lagu doodi karaa in dowladaha hoose ay si fiican u fahmayaan baa-hiyaha dadka deggan degmooyinka sidaas darteedna ay ku haboon yihiin bixinta badeecadaha iyo adeegyada.
- Fursad weyn oo jawaab-celin ah oo u dhexeysa muwaadiniinta iyo dowlada-ha hoose, taasoo keeni karta isla xisaabtan iyo horumarinta adeeg bixinta.
- Marka la eego in xulashadaan ay ugu dhowdahay xaaladda hadda jirta, waxa ay noqon kartaa tan ugu fudud in la hirgeliyo siyaasad ahaan.

### Dhaliilaha suurtagalka ah:

- Waxa laga yaabaa in ay dhaliso sinnaan la'aan badan oo ka dhexeysa dowlad-goboleedyada, maadaama nidaamka federaal ee daciif-ka ah uu awood yar u leeyahay dib-u-qeybin iyo isu-dheellitir.

- Sinnaan la'aanta ayaa laga yaabaa inay kororto iyadoo ay ugu wacan tahay helitaanka kheyraadka dabiiciga ah oo aan dheeli tirneyn iyo baahiyaha oo aan isku dheellitirnayn (tusaale saboolnimo heer sare ah oo ka jirta dowlad-goboleedyada qaarkood).

- Awoodda canshuur qaadista oo yaraata taasoo ka dhalaneysa iskusoo noq-noqoshada iyo is-waafajin la'aanta canshuuraha heer dowlad-goboleed, iyo sidoo kale tartanka canshuuraha ee u dhexeeya dowlad-goboleedyada.

- Jiritaan la'aanta isla xisaabtan maaddaama awooddu ay ku uruursan tahay heerka dowlad-goboleed, iyo korjoogteynta dowladda federaalka oo xaddidan.

- Waxay wiiqeysaa fursadda qorshe mideysan ee dowlad-dhisid ah, maadaama dowlad-goboleedyadu ay aad uga madax bannaan yihiin dowladda federaalka, iyaguna kala madax bannaan yihiin.

## Xulashada 3-aad: Mid daadejisan

Xulashadan waxa ay u dhexeeysaa labadii hore. Dowladda federaalka waxay yeelan doontaa awood dakhli-uruurin ka badan tan lagu xusay xulashada 2-aad, oo ay ku jiraan ganacsiga caalamiga ah, inkastoo canshuuraha laga qaado saldhigyada canshuuraha guur guura weli loo dhaafi karo dowlad-goboleedyada. Waxaa intaa dheer, xitaa haddii dowladda federaalka ay uruuriso dakhli badan, dowlad-goboleedyadu waxay – iyadoo loo marayo nidaamka wareejinta maaliyadeed ee shuruudihiisu yar yihiin – yeelan doonaan masuuliyad weyn oo ku saabsan qeybaha kala duwan ee kharash bixinta. Doorka dowladaha hoose waa la mideyn karaa, iyadoo la awood siinayo heerka xukuumadeed ee ugu dhaw muwaadiniinta marka ay timaado adeeg bixinta. Inkastoo dakhli-uruurintu ay ku badan tahay dowladda federaalka marka loo eego xulashada 2aad, xulashadan waxa ay weli la jaanqaadi kartaa naqshadda amniga iyo qeybinta awoodaha ee daadagsan, waxaana lagu fududeyn karaa iyadoo la dhisayo guddi maaliyadeed oo u dhexeeya dowlad-goboleedyada iyo dowladda federaalka si ay u horumariyaan habab ka madax bannaan siyaasad oo la xiriirta wareejinta maaliyadda. Sameynta hay'ad dakhli oo madax-bannaan, oo ay isla dhisaan dowladda federaalka iyo dowlad-goboleedyada, waxay sidoo kale keeni kartaa waxtar dhanka uruurinta canshuuraha.

| Awoodaha maaliyadeed | Dowladda federaalka | Dowlad-goboleedyada | Dowladaha hoose |
|---|---|---|---|
| Qaabeynta dakhli uruurinta | Dowladda federaalka iyo dowlad-goboleedyadu waxay wadaagayaan shaqooyinka dakhliga marka loo eego cidda iska leh saldhigga canshuuraha, dejinta qiimayaasha iyo qaadista canshuur iyadoo ku xiran heerka ugu habboon<br><br>Dowladda federaalka waxa ay awood ku leedahay canshuuraha muhiimka u ah xasilinta dhaqaalaha guud (tusaale, kastamyada iyo canshuuraha iibka), dib-u-qeybinta dakhliga (tusaale, dakhliga shakhsiga ah) iyo ilo dakhli oo aan si siman loo qeybsan (tusaale, kheyraadka dabiiciga ah)<br><br>Dhammaan heerarka dowladda waxay yeelan karaan canshuuraha faa'iidada (tusaale, canshuurta ganacsiga ee waafaqsan adeegyada ay bixiyaan | Dowlad-goboleedyadu waxay leeyihiin awoodo canshuureed oo la xiriira canshuuraha 'tooska' ah iyo in yar oo canshuuraha guurguura ah (tusaale, canshuur bixiyeyaasha si fudud uguma guuri karan dowlad-goboleed kale), sida canshuurta berriga, mushaarka, baabuurta iyo canshuurta iibka<br><br>Dhammaan heerarka dowladda waxay yeelan karaan canshuuro faa'iido (tusaale, canshuurta ganacsiga) oo waafaqsan adeegyada ay bixiyaan | Dhammaan heerarka xukuumadeed waxay yeelan karaan canshuuraha faa'iidada (tusaale, canshuurta ganacsiga) ee waafaqsan adeegyada ay bixiyaan |
| Waajibaadka kharash bixinta | Waajibaadka kharash bixinta la wadaago iyadoo lagu saleynayo heer kasta oo dowladeed ayaa ah kan ugu haboon uguna wanaagsan bixinta adeegyada<br><br>Dowladda federaalka waxay leedahay masuuliyadda keliya ee dhinacyada muhiimka ah sida amniga qaranka, siyaasadda arrimaha dibadda, socdaalka iyo siyaasadda lacagta<br><br>Dowladda federaalka waxa ay ilaalineysaa siyaasadda iyo howlaha kormeerka ee la xiriira alaabada iyo adeegyada muhiimka ah (sida caafimaadka iyo waxbarashada) si loo ilaaliyo tayada | Maamul-goboleedyadu waxay maamulayaan bixinta adeegyada (tusaale, caafimaadka, waxbarashada iyo ilaalinta amniga deeganada maamulka) kuwaasoo ku haboon in ay iyaga bixiyaan | Dowlad-goboleedyadu waxa ay sii daadajin karaan adeeg bixinta iyo dakhli uruurinta, iyagoo awood u siinaya dowladaha hoose bixinta iyo maamulka adeegyada |

| Awoodaha maaliyadeed | Dowladda federaalka | Dowlad-goboleedyada | Dowladaha hoose |
|---|---|---|---|
| Wareejinta maaliyadda iyo dakhli wadaagga | Wareejinta maaliyadeed waxa ay wax ka qaban kartaa sinnaan la'aanta ka dhex jirta dowlad-goboleedyada iyadoo la bxinaayo taageerada miisaaniyadda guud ee shuruud la'aanta ah taasoo la siinaayo dowlad-goboleedyada, laguna saleynayo qaab la isku raacay oo hufan. Tani waxay marka hore ku saleysnaan kartaa heshiis laga wada xaajooday, iyo dadka deggan maamul kasta<br><br>Taa bedelkeeda, wareejinta noocaas ah waxaa lagu go'aamin karaa qoondooyinka miisaaniyadeed ee dowlad-goboleedyada waxaana sidoo kale loo isticmaali karaa in lagu daboolo kala duwanaanshaha dhanka kheyraadka ee ka jira dowlad-goboleedyada dhexdooda<br><br>Heshiisyada dakhli-wadaagga ah ee kheyraadka dabiiciga oo loo qaabeeyey qaacido leh shuruudo qeexan iyo miisaan la xiriira | Dowlad-goboleedyadu waxay ka helayaan wareejinta maaliyadeed dowladda federaalka, ha ahaato mid waafaqsan miisaaniyadooda ama mid ku saleysan habka dakhli-qeybsiga<br><br>Marka la eego kheyraadka dabiiciga ah ee aan si siman u faafsaneyn, dowlad-goboleed kastaa wuxuu yeelan karaa cod siman si ay u go'aamiyaan siyaasadaha wadaagga dakhliga, si looga fogaado farqiga weyn ee helitaanka kheyraadkaas | Waxaa jira fursad u wareejin maaliyad ka imaaneysa dowlad-goboleedyada ee loo wareejinayo dowladaha hoose, sida ay u qorsheeyaan dowladda federaalka/ dowlad-goboleedyadu |

### Faa'iidooyinka suurtagalka ah:

- Isku dheellitirnaanta baahiyaha iyo masuuliyadda dowladda federaalka iyo dowlad-goboleedyada.
- Qeybinta masuuliyadaha waxa ay salka ku haysaa hadba heerka dowladeed ee ugu habboon in ay gaarsiiso muwaadiniinta, waxay ka muuqaneysaa awooddeeda kharash-bixineed.
- Waxa ay u baahan tahay wadashaqeyn weyn oo dhexmarta dowladda federaalka iyo dowlad-goboleedyada, iyadoo sal looga dhigaayo qorshe dowlad-dhis mideysan iyadoo la oggolaanayo madax-bannaani ballaaran.

### Dhaliilaha suurtagalka ah:

- Marka la eego wada-shaqeynta looga baahan yahay heerarka kala duwan ee dowladda, waxay qaadan doontaa waqti badan iyo is-afgarad si loo gaaro heshiisyo waana kan ugu adag in la gaaro siyaasad ahaan.
- Dowladda federaalka iyo dowlad-goboleedyaduba waxay u baahnaan doonaan inay ka tanaasulaan heerka madax-bannaanida siyaasadeed ee ay hadda heystaan si loo gaaro faa'iidooyinka wadaagga dakhliga iyo iskaashiga.

# Ka gudbidda xaaladda hadda jirta

Haddii go'aan lagu gaaro in laga guuro xaaladda hadda taagan (oo dhab aan ah xulashada habka baahsan) loona guuro mid kamid ah xulashooyinka kale, 'sida' loo heli karo hab maaliyadeed federaal ah oo la doortay wuxuu muhiim u yahay su'aasha ah hab noocee ah ayaa la dooranayaa. Iyadoo aan loo eegin habka la doortay, istaraatijiyad siyaasadeed oo ku saleysan xulashooyin farsamo oo wanaagsan oo u oggolaanaya in si taxaddar leh loo raaco dib-u-habeynta ayaa loo baahan yahay. In la qaato habka awoodda lagusoo uruurinaayo dowladda dhexe si ay u maamusho canshuuraha ganacsiga caalamiga ah tusaale ahaan, hannaanka wuxuu noqon karaa qaabkan soo socda:

1. In la sameeyo istaraatiijiyad ku saleysan baahida xaalad siyaasadeed iyo mid dhaqaale oo dowladda federaalka iyo dowlad-goboleedyada midkoodna uusan heysan dhaqaale ku filan oo ay ku daboolaan baahiyahooda misaaniyadeed. Tani waxay u baahan tahay in laga guuro doodda ku saleysan dhaqaalaha loona guuro dood ku saleysan nidaamyo. Wadahadalka noocan oo kale ah waxa uu diiradda saarayaa qeybsiga kheyraadka hadda jira taa beddelkeedana waxaa la eegi doonaa in la sameeyo nidaam sahlaya wadaagga kheyraadka mustaqbalka.

2. In la qeexo siyaasadda/doorka dowladda federaalka iyo dowlad-goboleedyada ee la xiriira masuuliyadda dakhliga, gaar ahaan cidda iska leh saldhigga canshuuraha, cidda dejineysa qiimaha iyo cidda uruurineysa. Si loo kordhiyo iskaashiga, masuuliyadaha waa la wadaagi karaa, iyadoo dowladda federaalka ay u uruurinayso canshuuraha dowlad-goboleedyada ama taa caksigeeda.

3. In la sameeyo nidaam mideysan oo wax lagusoo uruuriyo oo lagu maamulo deked kasta oo dalka ku taalla, lana dejiyo habab kala wareejin ah oo loo isticmaalayo tiknooliyad una shaqeynaya si fudud. Tani waxay noqon kartaa qaabka in dakhliga canshuurta ganacsiga lagu shubo xisaabaadka khasnadda dowlad-goboleedka ay khuseeyso uruurinta kadib. Kala wareejinta maaliyadeed ee u dhexeeysa dowladda federaalka iyo dowlad-goboleedyadu waxaa lagu ogaan karaa xisaabaadka maadaama Bankiga Dhexe ee Soomaaliya uu horey u lahaa awood uu ku maareeyo xisaabaadka khasnadda ee meelo badan ku yaalla.

4. Dejinta wakhtiyo kalaguur ah oo loo kala horeysiinaayo diyaarinta nidaamyada maamulka kahor qeybsiga dakhliga ganacsiga. Tusaale ahaan, muddo shan sano ah ayaa la dejin karaa inta lagu jiro xilliga dowlad-goboleedyadu ay heysan karaan dhammaan canshuuraha lagasoo uruuriyo dekadahooda iyadoo aan loo eegin kororka qiimaha. Kadib xilliga kala guurka, sharciga iyo siyaasadda lagu heshiiyey ee hababka dakhli-qeybsiga ayaa lasoo bandhigi doonaa. Tani waxay u oggolaanaysaa in la kobciyo awoodda dekedaha ee dowlad-goboleedyada, taasoo ah in ay keento kororka dakhliga iyo saldhig adag oo sax ah kuna saleysan gorgortanka siyaasadeed ee hababka wadaagga dakhliga.

5. Iyadoo ka dhigan tilaabo isla-ekeeysiin, dowladda federaalka waxay sii wadi kartaa taageerada ay siiso dowlad-goboleedyada aan lahayn dekado shaqeeya. Maaddaama dowladda federaalka ay sii wadi doonto in ay keento canshuuro ganacsi oo ka badan tan laga qaado dowlad-goboleedyada, wareejinta maaliyadeed waxay inta badan ka imaaneysaa dowladda federaalka oo la siinayo dowlad-goboleedyada inta lagu jiro xilliga kala guurka.

6. Dowladda federaalka waxay kaloo taageeri kartaa horumarinta dakhliga gudaha ee dowlad-goboleedyada. Tani waxay keeni doontaa kororka guud ee dakhliga gudaha dowlad-goboleedyada iyo dowladda federaalka, iyadoo sidoo kale u oggolaaneysa faham wanaagsan ee wadarta dakhliga si loo taageero gorgortanka siyaasadeed ee hababka dakhli-qeybsiga.

7. In la dhiso guddiyo farsamo oo lagasoo kala xulay hey'adaha ku habboon ee labada heer ee dowladda federaalka iyo dowlad-goboleedyada si ay u billaabaan xog-uruurinta aasaasiga ah ee loo baahan yahay si ay u taageeraan xulashooyinka hababka dakhli-qeybsiga.

8. In la sameeyo habab dakhli-wadaag oo siyaasad-ku-saleysan oo lagu hagayo wadaagga iyo qeybinta dakhliga ganacsiga kadib xilliga kala-guurka ee shanta sano ah.

# Talooyin tixgelin mudan

Heshiiska hababka maaliyadeed ee Soomaaliya waa mudnaan muhim ah. Wada-hadal siyaasadeed oo heerkiisu sareeyo loona dhan yahay ayaa loo baahan yahay si loo dhiso kalsooni looga heshiiyo hannaanka federaaleyn maaliyadda. Si uu u noqdo mid wax-ku-ool ah, wada-hadalka noocaas ah waa in lagu xiraa doodaha ku saabsan qeybaha kale ee lagu muransan yahay ee heshiiska siyaasadeed. Madasha Maaliyadda ee dowladda federaalka iyo dowlad-goboleedyadu waxay sidoo kale door muhiim ah ka ciyaari kartaa geeddi-socodkan, iyadoo madashu soo bandhigeyso xulashooyin heerka siyaasadeed looga wada hadalo. Habka kumeelgaarka ah oo ay faalladan soo jeedisay waxa uu mudan yahay tixgelin, maadama ay ku jiraan tallaabooyin kumeelgaar ah iyo habab abuuri kara kalsoonida loo baahan yahay si loo dhameystiro hannaanka federaaleynta maaliyadda ee Soomaaliya mustaqbalka fog.

## Xuquuq

Faalladan qotada-dheer waxaa si wadajir ah usoo saaray Somali Dialogue Platform iyo Kulan Consulting. Somali Dialogue Platform waa barnaamij Soomaalida ka taageera sidii loo gaari lahaa is-afgarad ku saabsan arrimaha la isku haysto ee siyaasadeed waxaana fuliya Machadka Rift Valley. Somali Dialogue Platform waxaa maalgeliya Foreign, Commonwealth and Development Office (FCDO) ee Boqortooyada Ingiriiska, Wasaaradda Arrimaha Dibadda ee Denmark, iyo Hay'adda Mareykanka u Qaabilsan Horumarinta Caalamiga (USAID). Aragtiyada faallada kama turjumayaan siyaasadaha rasmiga ah ee Dowlada UK, Dowlada Denmark ama Dowlada Mareykanka. Platform-ku wuxuu leeyahay madaxbannaanida tifaftirka warbixinnaddiisa oo dhan.

Kulan Consulting waa shirkad ay haween leeyihiin oo la shaqeysa dawladaha iyo hay'adaha ka shaqeeya arrimaha la xiriira geeddi-socodka siyaasadda, tayeynta hay'adaha maamulka, xasilinta bulshada, adkeysiga iyo kobaca dhaqaalaha.

MachadkaRift Valley wuxuu ka shaqeeyaa bariga iyo bartamaha Afrika si uu usoo saaro aqoon maxalli ah oo loo adeegsan karo horumarinta arrimaha bulshada, siyaasadda iyo dhaqaalaha.

Xuquuqda daabacaadda © Machadka Rift Valley 2022.

Warbixintan waxaa la daabacay iyadoo la adeegsanayo Creative Commons Attribution-NonCommercial-NoDerivatives License (CC BY-NC- ND 4.0).